

KNOW  
THE  
DANGERS  
.COM

# YAREYNTA WAXYEELLADAT

## Taageero Dhab Ah, Xukmin Ma Jirto

Yareynta waxyeellada ayaa ay ujeedadeedu tahay khafiifinta saameynta xun ee kadhatala isticmaalka daawada, sida cudur-gudbinta iyo dawo iska-badinta. Waxay ku lug leedahay bixinta daryeel xukmin la'aan ah oo loogu talagalay baahiyaha dadka isticmaala daroogada.

## Maxay taasi u egtahay?

Barnaamijyada yareynta waxyeellada waxay yareeyaan suurtagalinimada natiijooyin xun—kuwa isticmaala iyo bulshooyinkeena. Waa kuwan sida yareynta waxyeellada ay u egtahay:

### Barnaamijyada Adeegyada Saliingaha (SSP-yada)

Barnaamijyada Adeegyada Saliingaha (SSP-yada) waxay muhiim u yihiin caafimaadka dadweynaha, iyadoo bixinaya marin-u-helka ceeb la'aanta ah ee qalabka duritaanka nadiifka ah oona yareynaya khatarta caabuqyada. Barnaamijyadani waxay albaab u yihiin adeegyada daryeelka caafimaadka, kor u qaadista qubidda badbaadada ah ee cirbadaha iyo ka ciyaarista door muhiim ah xagga yareynta waxyeellada, mudnaansiinta caafimaadka iyo badbaadada dadka isticmaala daroogada iyo u faa'iideynta bulshada.

### Tijaabada Fentanyl

Xarriijimaha tijaabada Fentanyl waxay ka caawisaa kahortagga kuuro iska-badinta kama'da ah iyadoo u oggolaaneysa qofka inuu hubiyo walxaha sida heroin, cocaine, ama farxadda xad-dhaafka ah ee fentanyl. Xarriijimuhu waxay horumariyaan dhaqamada isticmaalka daawada ee badbaadada ah waxaana suuragal ah in ay badbaadiyaan nolosha inta ay jirto aafada opioid-ka. Hase yeeshee, ma ahan gaashaan buuxa, waxaana lagu talinayaa in taxaddar la sameeyo. Minnesota waxay bixisaa kheyraad kala duwan oo

loogu talagalay xarriijimaha tijaabada fentanyl oo ay siido kuwa isticmaalaya ama ka walaacsan qof isticmaala.

### Naloxone

Naloxone, sidoo kale loo yaqaano NARCAN®, waa-daawo nolosha badbaadisa oo dib-u-celin karta iska-badinta opioid-ka. Lagu qaato cirbad ama buufin sanko laga qaato ah, waa ay sahlan tahay in uu isticmaalo qofwalba oo leh tababar yar ama tababar haysan. Inkastoo aanay waxyeello lahayn, saameynta naloxone waxay baaba'daa kadib 30-45 daqiiqo, sidaas darteed gargaar caafimaad oo degdeg ah ayaa weli ah mid muhiim ah. Gudaha Minnesota, naloxone ayaa farmashiyada laga heli karaa waxaana qaadan kara oona bixin kara qofkasta.



WAXBADAN OO KUSAABSAN  
BARNAAMIJYADA YAREYNTA  
WAXYEELLADA KAHAL  
KNOWTHEDANGERS.COM